**Xeerka Wasiirka Arrimaha Gudaha**

**21 Feberaayo 1968, lamba. 93.**

**Nidaamka Nooca-Maamulka Shaqaalaha Dawladaha Hoose**

## WASIIRKA

Marka uu arkay Qod. 54 Xeerka 14 Agoosto 1063, lamba. 19, oo lagu baddalay Xeerka 13 Julaay 1965, lamba. 15;

Marka uu arkay Qod. 47 ee Xeer Nidaamiyaha Guud ee lagu fulinayo Xeerka 14 Agoosto 1965, lamba. 19 iyo wax ka baddallada ka dambeeya, laguna meelmariyay D.M 31 Oktoobar 1965, lamba. 277;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in la soo saaro Xeer Nidaamiyaha Nooca Maamulka Shaqaalaha dawladda hoose;

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada;

## WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

1. Waxaa la meelmariyay Xeer Nidaamiyaha Maamulka Shaqaalaha dawladaha hoose ee soo socda:
2. Maamul kasta ee Dawlad Hoose waa in uu samaystaa Nidaam Maamul shaqaale qaab waafaqsan xeerka, lixbilood gudahood oo ka bilaabata marka Dekereetadaan la soo saaro.

## XEER NIDAAMIYAHA NOOCA MEELAYNTA SHAQAALAHA DAWLADAHA HOOSE

## XEERAR GUUD

## CINWAANKA 1AAD

### Qod. 1

Xeer Nidaamiyahaan wuxuu xeerinayaa xaaladda sharciyeed ee karaaniyeyaasha iyo shaqaalaha mushaariga ee dawladaha hoose.

### Qod. 2

1. Karaaniyaasha, caadiyan waa shaqaalaha haya xilalka looga baahanyahay haysashada shahaado waxbarasho oo aan ka hoosayn shahaadada dugsiga dhexe ama shahaadada dugsiga hoose mid ahaan Maamulada dawladaha hoose dabaqadda A) iyo B) iyo Maamulada dawladaha hoose ee dabaqadda C iyo D);
2. Waxaa mushaari ah dhammaan shaqaalaha kale ee jagooyinka ay hayaan aan looga baahnayn in ay haystaan shahaado waxbarasho.

### Qod. 3

1. Maamul kasta ee Dawlad hoose marka ay samaysanayaan nidaamka meelaynta shaqaalaha waa in ay ku jaan gooyaan nidaam, si waafaqsan lifaaqa 1) ee Xeer Nidaamiyahaan nooca meelaynta, tirada jagooyinka, qaybaha, darajada la haysto, musaarka, cabbirka iyo tirada kororsiimaha xilliyeedka ee mushaarooyinka bilowga iyo sidoo kale shahaadada waxbarashada la isaga baahanyahay magacaabidda.

## CINWAANKA 2AAD

Shuruudaha Magacaabidda

### Qod. 4

1. Waxa loo magacaabi karaa karaani mushaari ah ee dawladda hoose keliya muwadinka anshax wanaagsan leh oo jir ahaan u qalma hawsha, gaaray da'da lix iyo toban jirka isla markaana aan ka weynayn soddon jir oo haysta shahaadaha waxbarashada ku qoran jaan goynta meelaynta;
2. Waxaa laga dhaafay xadka ugu sarreya ee da'da shaqaalaha hadda ku jira shaqada Maamulka Dawladda ama Maamul kale ee dawlad hoose.

### Qod. 5

Looma magacaabi karo jagooyinka karaanimada ama kuwa mushaariga:

a) — awood laawayaasha ama karti laawayaasha qaba cillad xagga dhimirka;
b) — ganacsatada musalifay, inta ay socoto xaaladda musalifnimada;
c) — kuwa uu ku dhacay xukun ciqaab xarig nooc kasta ha ahaadeen oo ka badan saddex sano;
d) — kuwa laga mamnuucay caafiisyada dawlasda.

### Qod. 6

Xaaladaha awood la'aanta ee ka reebayaa magacaabidda karaanimada waxaa ka dhalanaya in ay lumiyaan haddii ay dib ka yimaadaan.

## CINWAANKA 3AAD

Tartamada Dadweynaha

### Qod. 7

1. Magacaabidda kaalimaha iyo jagooyinka karaaniyaasha iyo kuwa mushaariga waxaa qasab ah in ay tartan dadweyne caama;
2. Tartamada waxaa lagu galayaa shahaado iyo imtixaam jagooyinka karaanimada iyo shahaado keliya jagooyinka mushaariga, haddii Maamulka bandhiggaas ku saabsan aanu jidaynin xaalad gooni ah in uu imtixaam ku waajibiyo xitaa kuwa mushaariga;
3. Tartamada waxaa qabanaya Duqa Magaalada saddex bilood gudahood oo ka soo bilaabato maalinta jagadaasu bannaanaatay.

### Qod. 8

Bandhigga tartanka waa in ay ku jiraan:

a) — shurudaha looga baahanyahay aqbalaadda tartanka iyo dokumentiyada la xariira ee la iska doonayo;
b) — mushaarka, halbeegga iyo tirada kororsiimaha xilliyeedka;
c) — haddii ay jiraan tijaabo xagga imtixaanka;
d) — mudda lagu keenayo codsiga aqbalaadda tartanka, taasoo aan ka yraan Karin affartan iyo shan cisho oo ka bilaabata taariikhda tartanka.

**Qod. 9**

1. Bandhigga tartanka waa in la baahiyaa ugu yaraa soddon cisho inta aanay idlaan muddada lagu keenayo codsiga aqbalaadda, xaafiiska Gobolka, Degmada ee Maamulka dawladda hoose ee shaqada ku leh hortiisa, iyadoo iclaanku uu dhagsanaan doono illaa ay ka dhammaato muddada idil ee la soo sheegay;
2. Haddii jagada loo tartamayo la iska rabo shahaado ka sarreysa waxbarasha dugsiga hoose, waxaa khasab ah sidoo kale in lagu baahiyo tartanka warbaahinta qaranka taaso la sameynayo ugu yaraan soddon cisho ka hor muddada loo qabtay in lagu keeno codsiga aqbalaadda.

**Qod. 10**

1. Ka sokow dokumentiyada la iska doonayo tartanka, musharraxu wuxuu keeni karaa dokumenti kasta oo wax ka taraya ama qiima u leh tartanka;
2. Codsiga iyo dokumentiyadu waa in ay noqdaan kuwa habaysan marka loo eego shuruucda canshuuraha (Bollo);
3. Dokumentiga caddaynaya akhlaaqda wanaagsan iyo sida loo soo samiyaay waa in uu noqdaa mid waqti dhow, oo aan ka badnayn saddex bilood oo laga joogo taariikhda la soo bandhigay tartanka, halka shardiga da'da waa in la haystaa dhicitaanka muddada lagu keenayo codsiga aqbalaadda tartanka.

**Qod. 11**

Arrimaha ku saabsan tartanada jagooyinka karaanimada ama kuwa amushaariga Guddiga garsoorka waxaa guddoominaya Duqa Magaalada ama cid uu isagu soo wakiisho, wuxuuna ka koobanyahay Guddigu sarkaalka ka socda kaalinta Maamulka rayidka ee Dawladda oo ay soo magacaabaan **masuuliinta ilaalinta**, xoghayaha dawladda hoose iyo laba xubnood oo ay soo magacaabaan Golaha dawladda hoose.

**Qod. 12**

Xoghayaha dawladda hoose ee Maamulka soo saaray tartanka wuxuu xitaa qabanayaa xilka xoghaynta Guddiga, wuxuuna qorayaa maxdarka hawlaha tartanka.

**Qod. 13**

Fadhiga ugu horreeya ee Guddiga garsoorka:

a) — waxay go'aan ka gaarayaan qaabka ugu muhimsan ee loo marayo qiimaynta shahoodooinka waxbarashada, u diyaargarowga farsamada hawlaha iyo wixii kale ee caddaynta imtixaamka;
b) — waxay hubinayaan, iyadoo la eegayo dokumentiyada la soo gudbiyay, aqbalaadda tartanka ee musharax kasta iyago qoraal ku sababaynaya wixii diidmo ah;
c) — haddii la iska doonayo shahaado ama imtixaam, waxa u qabanayaan taariikhda iyo saacada tijaaba kasta, iyadoo marka hore la qabanayo imtixaamka qorista, si saxana loo wargalinayo ku loo oggolaaday, lana siinayo ka hor ogaysiis ugu yaraan shan iyo toban cisho.

**Qod. 14**

1. Inta lagu jiro tijaabada qorista looma oggola tartamayaasha in ay wada hadlaan ama ay qoraallo isweydaarsadaan, iyo si kasta in ay u wada xariiraan, marka laga reebo xubnaha Guddiga garsoorka.
2. Waxaa manuuca in ay soo qaataan qoraallo, buugaag, jaraaid kasta ama waraaqo wax ku qoranyihiin, marka hawsha la qabanayo, haddii kale ay wax kama jiraan yihiin, waxaana lagu qorayo keliya waraqaha ay Guddigu garsooridda oo leh calaamadaha lagu dhigay;
3. Tartamayaasha waxay awood u leeyihiin in ay adeegsadaan Faafinta Rasmiga, iyo buugaagta aan faallooyinka lahayn, xeerarka, xeer nidaamiyeyaasha, amarrada iyo dekeretooyinka, sidoo kale in ay adeegsadaan qaamuusyada aan ahayn enjiklobediyeyaasha (enciclopedici);
4. Guddigu wuxuu u xilsaaranyahay dhowritaanka shuruucda ku jirta faqradaha qodobkaan iyo in uu qaado tallaaboyinka idil oo loo arko in ay lagama maarmaan u yihiin habsami u socodka tartanka, illaa imtixaanka laga eryo tartamayasha jabiya amarradaas.

**Qod. 15**

1. Go'aanka qofka laga gaarayo waxaa la barbar dhigayaa tartamayaasha iyado la sinayo darajooyinka u kala heleen;
2. Darajooyinka waxaa loo samaynayaa nidaamka kala koreynta tartamayaashu gaaray cod aan ka yareyn kan lagu baasayo;
3. Marka la samaynayo darajooyinka haddii ay isla ekaadaan, ama ay jirto mudnaan waxaa la doorbidayaa kuwa soo qabtay hawlo loo bogay;
4. Marka la soo gabagabeeyo hawl-qabadka, maxdarka laga sameeyay waxaa saxiixaya dhammaan xubnaha iyo Xoghayaha Guddiga waxana loo dhiibayaa Duqa Magaalada si uu u guto hawlaha u harsan.

**CINWAANKA 4AAD**

Magacowga, Dhaarta iyo Muddada Tijaabada

**Qod. 16**

1. Magacowga waxaa ka go'aaminaya Guddiga dawladda hoose ee shaqaalaha waxaana loo samaynaya sida darajooyinka ay isugu xigaan, marka ay ogaadaan saxnaanta habraaca;
2. Shaqaalaha waxaa lagu meelaynayaa xaafiisyadooda ama hawlaha marka magacowga go'aanka laga gaaro.

**Qod. 17**

Natiijada darajooyinka dadka tartanka ka soo qaybgalay waxaa lagu dhajinayaa albaabka dawladda hoose iyadoo uu wehliyo go'aanka lagu oggolaaday magacowga.

**Qod. 18**

1. Haddii guulaystaaasha ay ka tanasulaan ama magacowgu ka dhaco, ama sabab kasta ha ku dhacdee ay istaagto shaqada Maamulka waxay iqtiyaar u leeyihiin in ay magacaabaan ka qaybgalayaasha la caddeeyay in ay u qalmaan oo daraja ahaan iyaga ku xigay, muddo ku siman sanad oo ka bilaabata marka darajooyinka la oggolaaday;

2. Isla muddadaas gudaheeda inta lagu jiro haddiiba ay jagooyin kale bannaanaadaan oo la mida meeqaamka ama darajada, Maamulku wuxuu u magacaabi kaaa ka qaygalayasha kale oo la maqaama ama la darajo ah oo la caddeeyay in ay u qalmaan marka loo eego darajooyinkooda.

**Qod. 19**

Marka uu dhammaado magacowga iyo tijaabada, kuwa ku gulaystay tartanka waa inay qabtaan shaqada bil gudaheed oo ka bilaabata magacowga oo haddii kale shaqada waa ay luminayaan, marka laga reebo haddii uu jiro cudurdaar sababaysan.

**Qod. 20**

1. Marka tijaabada shaqada loo qaato, karaaniyaasha iyo kuwa mushaariga waxay ka hor dhaaranyaan Duqa Magaalada qaabka iyo siyaabaha shaqaalaha Dawladda u degsan;
2. Diidmada dhaarta waxay keenaysa in shaqada la waayo.

**Qod. 21**

1. tijaabada waxay soconaysaa lix bilood;
2. Marka ay dhammaato muddada tijaabada, qofka shaqaalaha wuxuu helayaa kaalinta shaqa qorista kaasoo ay go'aaminayso hay'adda bixisay tijaabada shaqa qorista;
3. Sababa la caddeeyay awgood Guddigu shaqaalaha wuxuu ku dari karaa saddex biloodo kale muddada tijaabada;
4. Haddii go'aanku yahay mid ka dani ugu jirin, Maamulku wuxuu baabi'I karaa heshiiska shaqada, isagoo soo saaraya go'aan sababaysan;
5. Haddiiba saddex bilood dhexdood marka ay ka soo wareegto dhicitaanka muddada tijaabada aanay la helin qararaarka mudda kordhinta, ama la helo ama go'aan ka dan ah, tijabadii waxaa loo qaadanayaa in la aqbalay.

**CINWAANKA 5AAD**

Dallacaadda

(Xasuus): Shuruucda ku qoran Cinwaankaan waxaa lagu dhaqayaa keliya Maamulka dawladaha hoose oo saldhig ku leh xarumaha waweyn, marka laga reebo, kuwa ay degganyihiin wax ka yar 8.000 qof. Maamullada kale, marka ay soo saarayaan nidaamyadooda meelaynta, waa ay ka maagayaan Cinwaankaan).

**Qod. 22**

1. Dallacaaddu waxay dhici karta keliya marka la buuxinayo jago bannaan;
2. qofka la dallacsiinayo waa in uu:
   a) buxiyaa kaalinta shaqaalanimada;
   b) uu haystaa dhamaan shuruudaha lagu buuxinay , marka laga reebo arrinta da'da;
   c) haystaa ugu saddex sanooo waayo aragnima agga shaqada darajada uu haysto;
   d) soo maray darajada ka hooseeysa midda bannaan;

e) saddexdii sano ugu dambaysay in aanu ku sifoobin daraja ka hoosaysa hufnaanta.

Haddiiba laga abuuro jagooyinka meel bannaan, Guddiga shaqaalaha waxay iqtiyaar u leeyihiin in ay go'aan ka gaaraan haddii jagada bannaan lagu buuxinayo dallaacaad ama tartan dadweyne la qabto.

**Qod. 23**

Haddi boos bannaan laga sameeyo shaqaalaha, guddiga shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay go'aamiyaan in jagada bannaan lagu buuxinayo dallacaad ama tartan dadweyne**.**

**Qod. 24**

1. Magacaabidda jagooyinka sare bilowga mid kasta oo qaybaha ka mida waxaa lagu bixi karaa tartan gudaha ah oo loo gaar yeelay dhammaan shaqaalaha maamulka oo buuxiyay shuruudaha looga baahanyahay magacaabidda, marka laga reebo xagga da'da.
2. Tartanka gudaha waxaa loo qabanayaa kolba sida sharcigu u dejiyay tartamada dadweynaha, waxaa kalo la qaban karaa marka ay ka soo wareegto shan iyo toban cisho taariikhda baahinta tartanka isaga ah.
3. Haddii tartanku yahay mid gudaha ah qasab ma ah in tartanka lagu baahiyo warbaahinta.

**CINWAANKA 6AAD**
**Waajibaadka iyo Masuuliyadda**

**Qod. 25**

1. Kala sareynta karaaniyaasha iyo kuwa mushaariga, sida ay qaybahooda ugu kala jiraan, ayaa caddaynaysa darajada, isla ekaanta darajada sidoo kalexil-waayeelnimada shaqada, iyo isla ekaanta, xagga da'da;
2. Wixii ku saabsan shaqada, karaani kasta ama mushaariga wuxuu hoos imaanayaa midka si dhow uga sarreeya shaqada uu hayo.

**Qod. 26**

1. Shaqaalaha la xakumo waa in uu qabtaa dhammaan wixii hawlo isaga loo xilsaaray isagoo si xilkasnimo leh u qabanaya sida ugu habboon oo xeerka iyo nidaamka waafaqsan ayna ku jirto danta Maamulka ee wanaagga guud;
2. Xiriirka lala leeyahay madaxda iyo jaallayaasha waa in uu noqdaa mid xambaarsan dadaal iyo karti iyo wadashaqayn waana in uu u noqda hoggaan iyo tusaale shaqaalaha hoose marka ay hawlahooda gudanayaan si loo hubiyo sida ugu wanaagsan ee shaqada looga miradhaliyo;
3. Xiriirka kala dhexeeya dadweynaha, hab-dhaqanka qofka shaqaalaha waa in uu ahaadaa mid ku dhisan kalsooni buuxda iyo wada shaqan daacada dadweynahaiyo Maamulka;
4. Qofka shaqaalaha marka aanu xaafiiska joogin waa in uu laasimaa anshax huffan oo la jaan qaadi kara sharafta iyo xilalka uu hayo.

**Qod. 27**

Haddii ay jirto baahi xagga shaqada, Maamulku wuxuu ka dalbi kara shaqaalaha in la qabto shaqada xitaa wax ka baxsan saacadaha shaqada waqtiga caadiga.

**Qod. 28**

Qofka shaqaalaha waa in uu xafidaa sirta xaafiiska xitaa haddii aanay ahayn kuwa qarsoodi ah, ma bixin karo macluumaad iyo xogag la xariira qaraarada hawlgallada maamulka nooc kasta ay yihiin iyo akbaar uu ogaaday ee la xariirata shaqadiisa, marka ay dhib u keenayso Maamulka am acid saddexaad.

**Qod. 29**

1. Shaqaaluhu waa in uu fuliyaa amarrada gudaha ee ka soo fula madada ka sarreeya ee lagu qabanayo hawlaha uu u xisaaranyahay;
2. Marka ay xilalkooda gudanayaan, haddii shaqaalaha hoose uu kala kulmo dhibaato ama wax aan habboonayn qaraarada madaxda, waa in uu u gaarsiiyay kan ka sarreeya isago qaabaynaya tusaalaha ugu habboon ee dhibaatada ama waxa aan an habboonayn looga bixi karo.

**Qod. 30**

1. Shaqaale kasta waxaa ku waajiba in uu u fidiyaa saaxiibadiisa iyo madaxdiisa shaqada sida ugu dhaqsiyaha badan ee lagama maarmaan ah, dhammaan kaalmada iyo wada shaqaynta la wadiisto oo danta shaqadu ay ku jirto, ha ahaato qaab joogto ah, marka hawlahaas fulintoodu ay ku jirto wada shaqayntaas, ama haddii kolba mar xaaladaha kale;
2. Shaqaalaha isku xaafiiska ah ama isla shaqeeya sidoo kale waxaa ku waajiba in ay wada shaqeeyaan ama isku baddalaan midba midka kale si loo hubiyo habsami u socdka xafiiska iyo hawlahala xariira.

**Qod. 31**

Qofka shaqaalaha ma diidi karo in uu si ku-meelgaara u guto xilalkiisa ama hawlaha la xariira hawlaha darajadiisa ama darajada ka sarreysa, xitaa haddii ay ka duwantahay mida uu isagu si caadi ah u xilsarnaa, haddiiba uu leeyahay shuruudaha looga baahnaa.

**Qod. 32**

Xoghayaha, ama cid kasta oo u xilsaaran hawlo, markasata waxaa loo wakiilan karaa isaga daraasadda iyo falanqaynta hawlaha dabeecad ahaan u gaarka ah ama u baahan aqoon gaara, xitaa haddii falanqayntoodu ay ka socotay xagga shaqaalaha hoose.

**Qod. 33**

1. Qofka shaqaalaha ma samayn karo ganacsi, warshado ama mehered kasta, ama qabto shaqooyin ama aqbalo xilal shirkadeed oo faaiido leh, marka laga reebo iskashatooyin ay samaystan shaqaalaha hay'daha dawladda;
2. Qofka shaqaalaha oo jabiya mamnuucidda ku xusan faqradda sare waxaa loo sheegaya in laga aamin baxayo si uu uga waantoobo xaaladdaas shaqadiisa ka horimaanayasa, marka ay ka soo wareegto soddon cisho taariikhda aamin baxa oo aanu ka joogsan hawshaas, qofka shaqaalaha wuxuu waynayaa shaqada dawladda hoose;
3. Muddada dhicitaanka waxaa go'aan ka soo saaraya hay'adda shaqada ku leh.

**Qod. 34**

Qofka shaqaalaha waa in uu ka maagaa in uu u sameeyo cabashooyin cid saddexaad oo la xariirta xiriirada Maamulka.

**Qod. 35**

Marka laga soo tago reebitaanada ku xusan Xeer Nidaamiyahyaan, xiriirin kasta iyo codsi kasta waa in la soo maraa habka kala sarreynta.

**Qod. 36**

Shaqaale kasta waa in uu wargaliyaa Xoghayaha cinwaankiisa iyo kolba wixii isbaddal ku yimaada.

**Qod. 37**

Qofka shaqaalaha si toos iyo si dadban u ogaada, falal ay ka dhalan karto masuuliyad marka la eego sida nidaamkaan ku qoran, waa in uu si deg-degga u soo wargaliyaa Xoghayaha ama Duqa haddii falalkaasu uu ka dhacen ama uu kala qaybgalay Xoghayaha, isagoo tilmaamaya dhammaan waxyaabaha uu ogyahay.

**Qod. 38**

Haddii karaaniga ama mushaariga uu dayn ka qabo Maamulka, lacagtaas waxaa laga goyn karaa dayntaas mushaarka qofka lagu leeyahay, si hafta ah bil kasta oo aan ka badnayn saddex meelood meel mushaarkiisa.

**CINWAANKA 7AAD**

Xuquuqda

**Qod. 39**

1. Qofka shaqaalaha wuxuu xaq u leeyahay xilka iyo mihnadda ku saabsan waxa uu u qalmo lagamana xayuubi karo xikiisa, marka laga soo tago mararka ay xeerka iyo Nidaamku sheegayaan;
2. Sikastaba, haddii ay jirto baahi xagga shaqada, Xoghayaha dawladda Hoose wuxuu u xilsaari karaa xitaa si joogto ah xilala iyo mihnado kale oo ay isku darajo yihiin, haddii uu haysto waxayaabaha looga baahanyahay.

**Qod. 40**

1. Shaqaaluhu wuxuu xaq u leeyahay mushaar, ku salaysan habka u degsan qaabka maamulka, oo la xariira qaybta iyo darajada uu haysto ee xeerku qorayo;
2. Mushaarooyinka waxaa la bixinaya bil kasta 27keeda, haddise maalinta 27ka ay ku soo aaddo maalin aan la shaqaynayn maalinta ku xigta ayaa la bixinayaa.

**Qod. 41**

1. Mushaarooyinka bilowga waxaa loo kordhinayaa shaqaalaha labadii sano kasta, iyo toddobada laba sanadlaha isku xiga si ku xusa qaabka meelaynta;
2. Marka labada sano buuxsanto ka dib maalinta ugu horreysa bisha ee ku xigta ayaa waxaa bilaabanaya kororsiimaha xilliyeedka;

3. Dhaqangalka kororsiimaha xilliyeedka, waxaa la qiimaynayaa xitaa hawsha laga hayo jagooyinka la darajada ah iyadoo xitaa la xisabinayo muddada tijaabada.

**Qod. 42**

Marka tartan ama sababa kale, shaqaaluhu uu u gudbo darajo leh mushaar bilow ah oo ka hooseeyo maqaamka uu joogo, waxaa loo gaar yeelayaa faraqa lacagta uu sida gaarka u mutaystay, oo wada koobaysa kororsimaha xilliyeedka mushaarkiisa.

**Qod. 43**

Saacadaha shaqada si wax ku oolnima loo qabtay oo ka baxan saacadihii caadiga ee shaqada, horayna loogu oggolaaday, shaqaale kasta wuxuu xaq u leyahay in la siiyo lacagta uu ku mutaystay saacadaha aan caadiga ahayn iyadoo loo eegayo halbeegga u degsan shaqaalaha Dawladda oo isaga u dhigma.

**Qod. 44**

Munaasabadaha Ciiddul Fidriga iyo midda Carafada shaqaalaha waxaa la siinayaa gunno ku salaysan hadba xeerka u degsan shaqaalaha Dawladda.

**Qod. 45**

Shaqaaluhu wuxuu xaq u leeyahay maalin nasasho toddbaakiiba, taaso ah sida dhaqanku yahay midda Dawladdu u aqoonsaday in ay tahay maalin nasasho.

**Qod. 46**

1. Shaqaalaha waxay xaq u leeyihiin, sanadka oo ay shaqeeyaan fasax caadiya oo ah soddon cisho oo mushaarkiis uu qaadanayo, lana siinayo hal xilli si isku xig-xiga, oo la jaan qaadaya kolba baahida shaqada;
2. Waxaa loo oggolyahay in fasaxa lagu bixiyo waqtiyo gaa-gaaban, hasayeeshe aan toddobaad ka yareyn;
3. Sanadka ugu horreeya ee shaqada fasaxa lama qaadan karo xilliga ugu horreeya ee tijaabada;
4. Qaadashada fasaxa sanadka dhexdiisa dib ayaa loo dhigi karaa ama la hakin karaa marka ay jirto baahi xagga shaqada, markaaaso kale shaqaaluhu wuxuu xaq u leeyahay in uu ka faaidaysto sanadka ku xiga.

**Qod. 47**

1. Shaqaalaha, ka sokow fasaxa caadiga, waxaa la siin karaa fasax aan caadi ahayn marka ay la soo daristo arrimo culus, kuwaso marka la isku daro aan ka badnayn soddon cisho, inta uu sanadku socdo;
2. Fasaxa aan caadiga ahayn sharciyan kama yaraan karo toddoba cisho haddii shaqaaluhu aroos galayo ama ay gasho geeri xagga qoyska darajada kowaad;
3. Waxaa u sugnaaday mushaarkiisa oo idil xaaladaha ku xusan faqradda labaad, iyo kala bar mushaarka xaaladaha kale.

**Qod. 48**

Iyadoo lagu muujinayo caddayn dhaqtareed, taariikhda loo malynayo umusha, shaqaalaha uurka leh ama dhalmada waxaa u sugnaaday fasaxa aan caadi ahayn iyo daryeel dhaqaale oo ku salaysan muddada ku xusan xeerarka u dagsan shaqaalaha rayidka ee Dawladda.

**Qod. 49**

1. Arrimaha ku saabsan daryeelka bulshada iyo kaalmada, xaqsiinta, hawlgabka iyo waxtar kasta ee dhaqaale oo ka dhasha joogsiga shaqada, waxaa lagu dhaqayaa xeerka u degsan shaqaalaha rayidka ee Dawladda;
2. Arrimaha ulajeeddooyinka lagu soo sheegay faqradda sare, lacagaha billaha mushaarka laga gooyo shaqaalaha dawladaha hoose, laga bilaabo 1da Jannaayo 1968, waxaa laga dhigay 2,50% waxaana lagu kordhinayo tabaruc la mida tiradaas oo uu bixinayo Maamulka dawladda hoose e uu ka tirsanyahay, iyadoo bil kasta uu ku xareeynayo hay'ad bangi oo dulsaar leh oo isla dawladda hoose ay ku qoran kuna magacaaban "Sanduuqa samafalka shaqaalaha dawladda hoose".

**CINWAANKA 8AAD**

Warbixinta

**Qod. 50**

1. Sanadka kasta, bisha jannaayo gudaheeda, qofka shaqaalaha waa in laga soo qoraa warbixin, gunaanadkeedu yahay qiimayn ah " aad u wanaagsan", "wanaagsan". "wacan", "meel dhex ama liita";
2. Qiimaynta dhammaystiran waa in la sababeeyaa;
3. Shaqaalaha ay warbixinta ku ridday ciqaab anshaxeed oo ka culus faaf-reebka lama siin karo qiimayn ka badan "wanaagsan".

**Qod. 51**

1. Warbixinta lagu soo sheegay qodobka sare waxaa samaynaya qofka darja ahaan ku xiga xagga kala sarreynta waxaana eegaya oo hubinaya Xoghayaha.
2. Qiimaynta la dhammaystiray waxaa la wargalinayaa shaqaalaha hannaan ku habboon, waxaana lagu qorayaa taariikhda la gaarsiiyay iyo saxiixiisa.
3. Soddon cisho gudahood, cidda danta ka leh waxay la xariiri kartaa Guddiga shaqaalaha, kuwaaso samaynaya qiimaynta kama dambaysta ah.

**Qod. 52**

1. Karaani kasta, Xoghayuhu wuxuu ka haynaya gal shaqsi ahaaneed oo leh macluumaadka xaaladahiisa;
2. Galka shaqsiga waa in ay ku jiraan dhammaan wixii go'aamo ah iyo dokumenti kasta ee quseeya xilalkii uu soo qabtay;
3. Bilowga macluumaadka waa in lagu tilmaamaa kaalinta hawlaha uu horay ka soo qabtay Maamulka dawladda hoose iyo wakaaladaha kale ee dawladda, qaraarada la xariira xaaladaha sharcii ee magacaabiddiisa, xilalkii uu soo qabtay, daryeelka dhaqaalaha, sidoo kale cinwaanka shaqaalaha iyo isbaddaladii soo maray.

## CINWAANKA 9AAD

Sugitaanka

### Qod. 53

1. Karaaniga waxaa la gelin karaa sugitaan marka ay la soo daristo waalli ama sababa gaar ahaaneed;
2. Galitaanka sugitaanka waxaa la samynayaa, shaqaalaha marka uu u soo gudbiyo codsi hay'addii shaqada u magacawday;
3. Waxaa kalo laga samayn karaa xaafiis ahaan marka ay jirto xaaalad waalli ah; markaaso kale qofka ay qusayso wuxuu codsan karaa marka hore in fasax la siiyo inta aan la gelinin xaaladda sugitaanka.
4. Shaqaalaha la geliyay sugitaanka sina ma sii heli karo jagadiisa.

### Qod. 54

1. Sugitaanka ku yimid waallida waxaa laga samaynayaa xaafiis ahaan ama haddii la codsado, marka la hubiiyo, iyadoo lagu saleynayo caddayn dhaqtareed sida ku xusan qod. 56 inu jiro cudu si ku-meelgaara shaqada joogtada ah ka reebaya;
2. Sugitaanka xagga waallida wuxuu dhammaanayaa marka ay joogsato xaaladdi keentay waallida mana sii socon karto wax ka badan laba iyo toban bilood saddexdii sano;
3. Maamulku, markasta wuxuu samayn karaa hubinta baarista caafimaadka ku habboon;
4. Inta lagu jiro sugitaankaas, shaqaaluhu wuxuu xaq u leeyahay kala bar mushaarkiisa lixda bilood ee ugu horreysa iyo saddex meelood meel intaas wixii ka dambeeya;
5. Haddiiba waallida kentay sugitaanka la xaqiijiyo in ay sabab u tahay shaqada, daneeyaha waxaa u sugnaatay mushaarkiisa oo idil.

### Qod. 55

1. Daneeyaha doonaya in uu helo sugitaanka sababa isaga u gaara awgood waa in uu soo gudbiyaa codsi sababaysan;
2. Maamulku waa in uu wax ka qabtaa bil gudahood, isagoo iqtiyaar u leh sababa shaqada awgeed in uu ku qaato qaraarka, diido codsiga, dib u dhigo aqbalaadda ama yareeya muddada sugitaanka la codsaday;
3. Sugitaankaas waa laga noqon karaa markasta haddi shaqada looga baahdo;
4. Sugitaanka kama badan karo affar bilood saddexdii sano iyadoo shaqaaluhu xaq u lahy wax lacaga;
5. Muddada lagu qaatay sugitaanka sababa gaara awgood wax kama tarayaan muddada xil-waayeelnimada, sida arrimaha loola jeedka meekhaanka shaqada laga gaaro iyo kororsiimaha.

### Qod. 56

Marka ay dhammaato muddada ugu sarreysa ee sugitaanka waallida, shaqaalaha aan u qalmin shaqada waxaa laga siidaynayaa shaqada, haddii aanay suurtagal ahayn in looga faaidaysto hawlo kale oo la xarriira shaqadiisa marka uu codsado.

**Qod. 57**

Haddii shaqada looga saaray sababa la xariira waallida iyo sababta waallida haddii shaqada ay ka timid, labadaba waxaa loo cuskanayaa caddayn dhaqtareed.

**CINWAANKA 10AAD**

Ciqaabaha Ansha-Marinta

**Qod. 58**

Shaqaalaha aan gudan waajibaadkiisa waxaa la marinayaa ciqaabaha anshax-marinta soo socda:

a) Faaf-reeb;
b) mushaarka oo laga jaro;
c) shaqada oo laga joojiyo;
d) la ruqseeyo.

**Qod. 59**

1. Faaf-reebku waa caddayn dhalacayn ah, qoraal sababaysan ah, kuna imaan karta gefaf fudud waxaan samaynaya Xoghayaha marka uu ku soo taliyo madaxa xagga sarreeyta ku xiga, ama uu dhagaysto talada midkaas;
2. Ciqaabaha ka culus faf-reebka waxaa la ridayaa, marka dacwad rasmiya ay ku qaadaan guddiga anshax-marinta ee lagu dhisay si wafaqsan qodobka soosocda.

**Qod. 60**

Maamul kasta ee dawlad hoose waxaa ka dhisan Guddi anshax-marin ee shaqaalaha dawladaha hoose, oo uu guddoomiye u yahay Duqa Magalada xubnnana ay ka yihiin Guddiga shaqaalaha, oo lagu soo biiriyo  wakiil ka tirsan shaqaalaha dawladda hoose kaasoo uu soo sharraxo Xoghayaha dawladda hoose isla markaana Duqa magaalada uu magacaabo.

**Qod. 61**

1. Goynta mushaarka kama yaraan karto toban meelood meel kamana badan karo shan meelood meel, muddo saddex bilood ka bandanna ma socon karto.
2. Goynta mushaarkaas waxaa ka imaanaya in uu ka daaho hal sano kororka mushaarka sanadlaha.
3. Guddiga anshax-marinta goynta mushaarka waxay samaynayaan marka uu jiro:
   a) — Dayac xooggan ee xagga shaqada;
   b) — dhowris la'aanta waajibaadka xaafiiska;
   c) — dhaqan silloon ee xagga madaxda, saaxiibada, shaqaalaha iyo dadweynaha, ama hab-dhaqan aan ku habbonayn anshax xilka ama xadgudub sirta xaafiiska, markasta haddii gefafka aanay lahayn dabeecad ka culus;
   d) —gefafka soo noq-noqday oo horay keenay faaf-reeb.

**Qod. 62**

1. Ka joojinta shaqada waa in laga fageeyo shaqada iyadoo mushaarkana laga joojinayo muddo aan ka yareyn hal bil kana badnay lix bilood;

2. Ciqaabta waxaa ku ridaya Guddiga anshax-marinta:
   a) — xaaladaha ku xusan qodobka sare, haddii gefafku ay leeyihiin dabacad culays gaara leh;
   b) — xurmo darro xagga Maamulka ama madaxda oo keenaysa in lagu waxyeelleeyo sharaftooda;
   c) — shaqada oo loo adeegsado ulajeeddo shaqsi ah;
   d) — xadgudub sirta xaafiiska, taaso danaha Maamulka u keentay dhibaata culus;
   e) — hab-dhaqan keenay hakad ama arbushaad habsami u socodka iyo jogtaynta shaqada oo lagu muujiyay qoraal ama falal xeerarka ama nidaamyadu ka reeban;
   f) — soo noq-noqashada gefafka sababay in mushaarka la gooyo.
3. Ciqaabta jooginta shaqada waxaa la wargelinaya shaqaalaha hoose haddii shaqaaluhu ay xadgudub kula kaceen.
4. Shaqaalaha uu ku dhacay ciqaabta joojinta shaqada ma heli doono kororsiimaha mushaarka ee xilliyeedka mana dallaci karo haddii aanay ka soo warreegin laba sano taariikhda gefka.

**Qod. 63**

1. Ruqsaynta waxaa soo saaraya Guddiga anshax-marinta:
   a) — arrimaha mujinaya dareenka xilkas darrida iyo damiir la'aanta, sidoo kale arrimaha sida daran liddiga ku aha waajibaadka daacadnimada karaaniga;
   b) — xadgudubka culus masuuliyadda iyo kalsoonida;
   c) — xadgudubta kas iyo maanka ee waajibaadka xaafiiska oo maamulka ku keena dhibaato culus ama wakaalada kale ee dawladda iyo dad gaara;
   d) — adeegsiga sharci darroo ama burburinta lacag uu maamulo ama u hayay ama ka maagay xadgudub la xariira shaqaalahiisa;
   e) — weydiistay ama aqbalay abaalgud ama waxtarro la xariira macaamil uu sameeyay shaqaaluhu ee shaqada la xariira;
   f) — arrimo culus ee kala dambay la'aanta fagaare ka dhacday, ama kicin sababtay kala dambayn la'aanta;
   g) — ku booriyay arrimaha ku xusan xarafka f);
   h) — marka, sabab la'aan aanu shaqada ku soo laaban muddadii loo qabtay, amse uu ka maqnaado shaqada muddo aan ka yareyn shan iyo toban cisho;
   i) — gefaf soo noq-noday oo keenay in shaqada laga joojiyo.

**Qod. 64**

1. Dabbaqaadda anshax-marinta waa in laga horreysiisa qoraal loogu sheegayo arrimahaa iyado loo qabanayo muddo aan ka yarayn toban cisho si uu ula yimaada cudur daarkiisa;
2. Ciqaabta anshax-marinta ka sarreysa faaf-reebka waa in loo maraa habraac ku xusan Cinwaanka koow iyo tobnaad ee Nidaamkaan.

**Qod. 65**

1. Shaqaalaha waxaa la ruqsaynaya, isagoo aan la marin habraaca anashax-marinta, marka uu ku dhaco xukun ciqaab dhaqan galay ee booli qaran, wax is-dabamarin, baad, musu-

maasuq, been abuur, tuuganimo, lunsasho, iyo guud ahaan xukun kasta oo sababya in laga mamnuuco qabashada joogtada ee xaafiis dawladeed ama ilbadinta gaarka ee masuulinta boliiska, xitaa haddii uu dhaco qaraar lagu cafiyay;

2. Ruqsaynta la soo sheegay waxay imaanaysaa isla marka ay dhacaan xaaladaha lagu sheegay qodobkaan.

**Qod. 66**

1. Xoghayaha wuxuu ka joojin karaa mushaarkiisa shaqaalaha ay ku socoto dacwad ciqaabeed ee dambi, haddii loo gooyay warqadda qabashada waa in u si deg-degga uga joojiya mushaarka;
2. Haddii dacwadda ciqaabta ay ku soo gabagabowdo amar ama xukun kamadambays ah, oo meesha ka saaraya falka lagu soo eedeeyay, amse arrinta oo jirto, meesha laga saaray in shaqaaluhu uu ka qayb qaatay, joojinta waa laga noqonayaa shaqaalahana waxuu yeelanayaa xaqa mushaarooyinka ka baaqday;
3. Sikastaba Maamulku, haddii ay la noqoto in dacwadda ciqaabta ay ka soo bixi karan dhacdooyin iyo xaalado keeni kara ciqaab anshaxeed, wuxuu ku tallaabsan karaa amarka ku xusan Cinwaankaan;
4. Muddada joojinta dammandeed waxaa lagu xisaabinayaa ciqaabta;
5. Ka noqoshada joojinta waxay fursad u siinaysaa dib u helidda xil-waayeelidda ka luntay.

**Qod. 67**

1. Haddii arrimaha ay culusyihiin, Xoghayuhu wuxuu amri karaa in shaqaalaha shaqada laga joojiyo xitaa ka hor doodad arrimaha loo haysto, muddo aan ka badnayn toban cisho;
2. Muddada joojinta dammaanadeed waxaa lagu xisaabinayaa ciqaabta;
3. Haddii dacwadda anshax-marinta ay ku soo afjaranto in lagu waayo waxyaabihii loo haystay ama dacwad ka culus joojinta, daneeyuhu wuxuu dib u hananayaa xil-wayeelnimadii ka luntay, marka laga reebo xaaladaha mushaarka laga yareyn karo.

**Qod. 68**

Inta lagu jiro muddada ku xusan qodobada 60, 64 iyo 65 qoyska waxa la siin karaa lacag ay wax ku quutaan oo aan ka badnayn saddex meelood meel mushaarkiisa.

**CINWAANKA 11AAD**

Dhammaadka Xiriirka Shaqada

**Qod. 69**

1. Markasta shaqaaluhu xaafiiska wuu ka tegi karaa;
2. Istiqaaladdu waa in qoraal lagu keenaa;
3. Shaqaalaha istiqaaladda keenay waa in uu sii wataa gudshada waajibadkiisa inta looga soo sheegayo aqbaladda istiqaaladda;
4. Aqbalaadda istiqaaladda lagama daahin karo wax ka badan saddex bilood.

**Qod. 70**

1. Shaqada waa laga saari karaa shaqaalaha gudan kari waaya shaqadiisa, amase muujiyay karti darro ama ku sifoobay liidnimo xagga shaqada;

2. Waxaa loo aqoonsanaya liidnimo xagga shaqada shaqaalaha horay loo digay, laba sano oo isku xigta lagu warbixiyay qiimaynta ka hoosaysa “wanaagsan”;
3. Ruqsaynta karti darrada waxaa lagu saleynayaa habraaca ku xusan qod. 56 ee Nidaamkaan.

**Qod. 71**

1. Shaqaalaha waxaa shaqada xaafiiska laga siidaynayaa marka ay u buuxsanto da’da lixdan iyo shan sano;
2. Iyagu waxaa kalo shaqada laga fariisin karaa; marka kasta haddii jagada la baabi’iyo, markasta aanay suurtagal ahayn in meel kale lagu meeleeyo oo isla darajadaas ama mid ka hoosaysa ah.

**Qod. 72**

1. Iyadoo lagu saleynayo caddaynta dhaqtarka, marka ay dhacdo ruqsadda waallida ama karti darrada, Maamulku wuxuu shaqaalayn karaa karaaniga ay caddaato in uu marlabaad shaqada u qalmo lana geeyo jago bannaan oo isla darajadiisa ah ama mid ka hoosaysa; iyadoo xaaladdaan dambe Maamulku uu ku meelayn karo jago isla darjadaas ah ama mid ka hoosaysa;
2. Wuxuu xaq u leeyahay in shaqada lagu celiyo, haddi xitaa ay tiradu saaid tahay, shaqaalaha loo aqoonsaday in aanay jirin waxyaabahii sababy ruqsaynta, isago weliba xaq u leh in loo aqoonsado xil-waayeelnimadii uu ku waaqyay ruqsaynta.

**CINWAANKA 12AAD**

Xeerarka Kalaguurka iyo Gunaanadka

**Qod. 73**

1. Haddiiba loo baahdo in shaqaale loo qoro hawlaha xilal looga baahanyahay aqoon ama takhasus gaara, Maamulku wuuu shaqaalayn karaa xitaa shisheeye, marka ay jirto duruufo gaara, iyadoo dhaqaalaha lagu siinayo hadba xaaldda jirta. Shaqaalayntaas waxaa la samayn karaa xitaa tartan la’aan;
2. Go’aamada arrimahaas ku saabsan waxaa gaaraya Golaha dawladda hoose.

**Qod. 74**

Duruufo baahi gaara iyo muddada go’aamadaas la sameynayo, waxaa la qori karaa shaqaale maalinle ah, kuwaaso lagu mushaario maalinta iyo saacdaha ay sida wax ku oolka u shaqeeyaan iyadoo markasta loo hoggaansamayo qodobada Xeerka Shaqadu qorayo.

**Qod. 75**

Xaaladaha si ka duwan aan nidaamkaan ama nidaamyo gaara aanau u sheegin, shaqaalaha waxaa lagu dhaqayaa xeerarka shaqaalaha Dawladda marka la dabbaqi karo.

**Qod. 76**

1. Shaqaalaha dawladda hoose ee heshiisyo gaara lagu caymiyay ulajeddo xaqsiin awgeed shaqadii ka dhammaatay, oo bixiyay qaaraanno lacag aan ka badnayn 2,50 sida ku xusan qod. 49, faqradda 2aad ee Nidaamkaan, wuxuu xaq u leeyahay in u soo celiyo dheeraardka Maamulka dawladda hoose ee uu ka tirsanyahay;

2. Si ka baddalan xeerarka jira, waxaa kaloo la oggolyaya dhammaynta shaqada marka la codsado, iyadoo xaq loo leeyahay xaqsiinta ku habaysan billaha mushaarkii ugu dambeeyay sanad kasta ee uu soo shqeeyay, kuwooda soddon cisho gudahoo marka nidaamka cusubi dhaqangalo ay soo qaddimaan codsig hawlgalladooda iqtiyaariga, iyagoo luminaya xaqa cawil-celinta ku xusan faqradda sare.

Muqdisho, 21 Feberaayo 1968.

Wasiirka
**Yaasiin Nuur Xasan**

**SHAXDA QAAB-MEELAYNTA SHQAALAHA DAWLADDA HOOSE**

| Tirada jagooyinka | U qalmidda shaqaalaha | Xaafiiska ama Shaqada uu shaqaaluhu ka tirsanyahay | Shahadada waxbarashada ee la doonayo si qaato | Qaybta (2) | Darajada (3) | Mushaarka lagu bilaabay | Halbeegga muddada mushaarka lagu bilaabay |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | | |

**XASUUSTA** lamba. 1 — U qalmidda aad loo isticmaalo waa Cutubka Qaybta dabaqadda I iyo II, Madaxa Farsamada, oo la dabbaqayo, Dabbaqaadda Kowaad, la dabbaqay, Taliyaha Ciidanka Dawladda Hoose, Askarta Dawladda Hoose, Taliyaha suuqa, madaxa suuqa, askariha canshuur qadaha suuqa, ogaysiis qaadaha, iwm.

**XASUUSTA** lamba. 2 — Qaybaha shaqaalaha waxaa loo sameynayaa sida soo socota:

Qaybta B – Shaqaaaha looga baahanyahay shaqalayntooda shahaadada dugsiga sare;

Qaybta C – Shaqaalaha looga baahanyahay shaqalayntooda shahaadada dugsiga dhexe;

Qaybta D – Shaqaalaha ka soo haray.

**XASUUSTA** lamba. 3 – Waxaa lagu qorayo caadiyan darajada koowaad Madaxa Qaybta ee dabaqadda I, darajada labaad midka ugu sii xiga daraja ahaan, iyadoo sidaas ay ku sii soconayso.